



**DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA**

**PUNTLAND STATE OF
SOMALIA**

16 Agoosto 1998

DEKREETO MADAXWEYNE LR. 001

Madaxweynaha Dawladda Puntland,

ISAGOO TIXRAACAYA: Axdiga Dawladda Puntland, Qodobadiisa 12.2, 12.5, Qaybtiisa 3aad iyo 13.1;

MARKUU LA TASHADAY Madaxweyne Ku-Xigeenka;

MARKUU LA YEESHAY wada-tashi Isimada, guurtida, waxgaradka iyo qoonyahannada, Culamada diinta, kooxaha dumarka iyo qaybaha kala duwan ee bulshada Gobollada Dawladda Puntland;

MARKUU QIIMEEYAY baahida maamul ee Gobollada Puntland;

WUXUU DHISAY SAGAAL WASAARADOOD oo kala ah:

1. Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Diinta
2. Wasaaradda Gudaha & Nabadgelyada
3. Wasaaradda Maaliyadda
4. Wasaaradda, Ganacsiga & Warshadaha
5. Wasaaradda Adeegyada Bulshada
6. Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Beeraha & Degaanka
7. Wasaaradda Kaluumaysiga & Khayraadka Dabiiciga
8. Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta, Hidda & Dhaqanka
9. Wasaaradda Hawlaha Guud & Gaadidka

**ISLA DEKREETADAAN WUXUU MADAXWEYNUHU KU
MAGACABAY SAGAAL WASIIR** oo kala ah:

1. Shiikh Cali Nuur, Wasiirka Caddaaladda & Arrimaha Diinta
2. Dr. Xassan Abshir Faarax, Wasiirka Gudaha & Nabadgelyada

3. Md. Saciid Maxamed Maxamuud, Wasiirka Maaliyadda
4. Md. Cali Ismaaciil Cabdigiir, Wasiirka Ganacsiga & Warshadaha
5. Dr. Yassin Faarax Cartan, Wasiirka Adeegyada Bulshada
6. Md. Xuseen Ismaaciil, Wasiirka Xanaanada Xoolaha, Beeraha & Degaanka
7. Md. Maxamed Muuse Kaynaan, Wasiirka Kaluumaysiga & Khayraadka Debiiciga
8. Md. Cawad Axmed Cashara, Wasiirka Warfaafinta, Isgaarsiinta, Hidda & Dhaqanka.
9. Md. Axmed Cabdi Maxamud, Wasiirka Hawlaha Guud & Gaadiidka

Dikreetadaan waxay si rasmi ah u hirgaleysa markuu ogolaado Golaha Wakiiladu. hase yeeshee baahida maamul ee jirta awgeed iyo daryeelka danaha, wasiiradu waxay hawsha u sii wadayaan si ku meel gaar ah.

Hawlgal Wacan,

Md. Cadullaahi Yusuuf Ahmed
Madaxweynaha Dawladda Puntland